# CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

## Talooyin Kooban

Kormeer Joogto ah: Xiliyada Firaaqada

### Macnaheed Ilamaha oo Joogto Loo Kormeero?

Daryeeluhu wuxuu masuul ka yahay xajinta amaanka caruurta. Ilmaha oo si joogta loo kormeero waxay u baahan tahay foojignaan, isu golayn, iyo ku talagal in la joogteeyo kormeerka.

Isticmaal xirfado ay ka mid yihiin dhegaysi sharqanta ilmaha, waraysi, iyo kormeer joogto ahi u leh faa'iidooyinka soo socda:

- Ka hortagid dhaawac inuu yimaado.
- Jawi xasiloon inuu dhasho.
- Daryeeluhu inuu helo aqoon kororsi ah.
- Marnaba ilmaha la cidlayn.

### Siyaabo loo joogteeyo kormeerka ilmaha

Ilmaha oo si joogto ah loo kormeero waxay sugi amaanka, ka hortaga dhaawaca, and daryeelka guud. Siyaabahani waxay suurto geliyaan ka hortaga dhib iyo dhaawac ilmuha soo gaari lahaa, iyo mutaan fal xun oo loo gaysto.

Kormeer joogto ah waa in la siiyo ilmaha dhashay, kuwa socod baradka ah iyo kuwa iskuulayda ah iyadoo la kormeeri waqti walba sida marka ilmuhu hurdo, cuntaynayaan, ama dibada ku ciyaarayaan. Intaa waxaa dheer, in la kormeeraa ilmaha marka laga badalayo xafaayada, ama musqusha isticmaalayaan (iyadoo la eegayo hadba da'doodu intay tahay iyo waxay qaban karaa). Daryeeluhu wuxuu mas'uul ka yahay inuu la socdo ilmahu wuxuu leeyahay ama samaynayo meeshuu joogaba si hadii loo baahdo degdeg wax uga qaban karo waxii soo kordha . Kormeer joogta ah haduu jiro, daryeelahu si degdeg oo hufan ayuu ilmaha u caawin karaa, ugana dhexsaari karaa wixii dhib leh oo soo foodsaara.

Xeeladaha soo socda waxay aasaas u yihiin in lagu guuleysto dhaqan gelinta kormeer joogto ah iyo abuurista jawi degan:

- Jawiga goobta oo la habeeyo
- Shaqaalaha oo midba mas'uul looga dhigo meel cayiman
- Dulmar iyo Tiris
- Maqal iyo dheg u la'haansho
- Fahamsanaan da'da iyo dhaqanka ilmaha iyo waxa laga filan karo
- Hawl-gelin ilmaha iyo dib u jihayn

#### Habayta Goobta Daryeelka

U qorshee goobta daryeelka inay ahaato mid aan xayirin daryeelaha oo si bayaan ah loo gu jeedo wax walba oo goobta ka socda, ha ahaato arigtida ilmo iskii u ciyaaraya ama kuwo koox-koox isula jira ama u wada ciyaaraaya.

- Isku meel ka yeel qalabka ciyaaraha ilmuhu u dhan yihiin.
- Dherarka qalabka ciyaartu ha ahaado mid ilmaha badhkood le'eg ama ka gaaban.
- Meelaha yar-yar ee ilmuhu ku ciyaaraan ka ilaali xafashka.
- Samee aagag waaweyn oo leh goobo cayaareed oo si fudud loo arki karo.

### Ku Beeg Shaqaalaha meel Imaha Laga Arko

Daryeeluhu waa inuu joogaa meel si fudud ilmaha looga arko, looga maqli karo, loona gaari karo ilmo walba mar walba hadii wax dhacaan.

- Hubso in meelaha la maraa banaan yihiin si shaqaaluhu dhakhso ilmaha u gaari karaan haddii loo baahdo.
- Ka ag dhowaw carruurta u baahan caawinaad dheeri ah.

Caddada shaqaalahu waa in loo miisaamo mida caruurta dhamaan waqtiga rugta daryeelku furan tahay. Sidoo kale waa inuu jiraa qorshe dagsan oo lagu maamulo goobta kuwaa soo daryeelaha u suurtogelin inuu helo cawimaad hadii isbeddelo aan la filayn dhacaan, ina suurto gelin inuu helo gargaar dheeraad ah daryeelaha oo ka tagin meesha uu joogo ama aagga.

### Tirokoob iyo Kormeer

Daryeeluhu waa inay u tirsan yihiin caddada ilmaha uu hayo. Tirisku wuxuu ka hortagaa ilmahu inuu ka haro ilmaha kale iyo qofka- wayn oo la socda; khatartani waxay dhacdaa gaar ahaan inta u dhaxaysa labo meelood. Waxaa ugu fiican in la yeelo:

- Mar walba oo isha lagu hayo ilmaha, la tiriyo, oo dheg loo lahaado.
  - Shaqaaluhu waa inuu afka ka oran karo caddada tirada ilmaha uu hayo.
- In la diiwaan geliyo cadadda tiradda ilmaha—xisaabtoo lagu darayo kuwa  tagay ama yimid oo ku soo biiray kooxda—si loo hubsado tiradu guud inay saxan tahay.
- Marka la tirin ilmaha iyadoo muuqaal iyo magacyada cunug walba la isku soo qabtaa.

### Dhegayso

Sharqamaha qaarkood, ama sharqan la'aah dhiilo ayay siyaadisaa. Xarumaha daryeelku wuxuu dhaqan-gelin karaa in la siyaadiyo waxyaabaha amaanka sugga sida dawan yeera marka albaabadda la furo si daryeeluhu u ogaado hadii ilmo baxo ama soo galaan qolka.

### Faham Ilmaha da'da iyo Dabciga ilmaha Laga Filan Karo

Daryeelaha fahamsan waxa laga filankaro caruurta da'dooda iyo dabciga khaasiyan ah ayaa si fiican uga hortagi kara khataraha imaankara. Daryeelahani wuxuu kaloo fahmi karaa mararkay u badan ahay ilmuhu inuu baxo, xanaaqo,  ama sameeyo wax khatar u keeni kara.  Ogow waxa ilmaha laga filan karo  da'daas ah adigoo adeegsanaya aqoontaada gaarka ah, cunug walbana siinaya kormeer u dhigma da'diisa. Kuna xisaabtamaya ilmahaa wuxuu qaban karo, iyo waxyaabaha uu xiiseeyo.

### Xiiso Gelin iyo Mashquulin

Daryeel bixiyeyaashu waxay adeegsan karaan waxa ay ka ogyihiin ilmo kasta baahidiisa shaqsiyeed iyo heerka koriimadiisa si loo siiso gargaar ku munaasib ah ilmahaas. Ilmaha intaadan caawin, sii fursad u awoodiisa ku tijaabiyo balse caawi hadii ay ku adkaato ama awoodin inuu is caawiyo ama xaliyo wixii la rabay inuu kaligii qabsado.

## Kormeer Joogto ah Waqtiyada Firaaqada

Kormeerka joogtadda ee wanaagsan wuxuu ku saabsan yahay:

1. Ogaanshaha canug walba heerka koriimadiisa, iyo wuxuu qaban karo.
2. Dejinta xeerar lagu dhowro amniga oo si fudud loogu dhaqmikaro.
3. Ka feejignaan iyo indho- ulahaansho khataraha imaan kara.
4. Joogsiga bartame ilmaha laga eegi karto, ishana lagu hayn karo aaga ilmuhu joogaan oo dhan.
5. Socsoco oo kormeer hawlaha Meesha ka socda.

6. Xaga wanaagsan wax ka eeg si carruurta xasilooni loo baro muhiimada dhowrista amaanadda.
7. Baritaanka caruurta sida habboon ee loo isticmaalo qalab kasta oo lagu ciyaaro (cagaha la hormariyo marka la taraaraxayo).

## Barnaamijka oo Lagu Cawimo Xoojinta Kormeerka Joogtadda ah

Dhaqangelinta xeeladaha kormeerka joogtadda ahi wuxuu u baahan tahay qorsheyn, maamul, kormeer joogto ah, iyo horumar xirfadeedka shaqaalaha oo la xoojiyo.

- Macalinka oo mas'uul looga dhigo caruur tiradoodu kooban tahay, iyo dhiirigelin xiriir wanaagsan inuu ka dhaxeeyo carruurta iyo daryeelaha.
- Xiriir xoog leh oo ka dhexeeya macallimiinta iyo carruurta ayaa ka caawiya shaqaalaha inay dhisaan wacyiga horumarka canug walba iyo inay noqdaan kuwo la jaanqaadaya baahida ilmaha iyo meesha uu ku sugan yahay.
- Iska warqab iyo wada shaqayn joogto ah oo shaqaalahu falanqeeyaan baahida carruurta iyo isbedalkii ku yimaada jadwalka wuxuu faaido u leeyahay fahamka koriimadda carruurta iyo amaanadda.
- Markuu qof kastaa fahmo hab-dhaqamada daryeelka ilmaha iyo mas'uuliyadda ka saaran badbaadada carruurta, way yaraan heerka khataraha dhaawaca keena iyo dhacdooyinka khatarta ahina way yaraan.

## Xog Dheeraad Ah

Daryeelka Caruurteena: Heerarka Caafimaadka Qaranka iyo Amaanka looga baahan yahay https://nrckids.org/CFOC/Database/2.2.0.1

Head Start I ECLKC: Kormeer Joogto ah https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/safety-practices/article/active-supervision

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.inclusivechildcare.org.

Copyright © 2021 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeeddooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.